

Kaarkaaga Aqoonsiga Xubinimo

Waxaad qorshaha ilkaha ka soo dooran kartaa mid ka mid ah shan hawl-wadaagayaasheena daryeelka bixiya ah. Macluumaadkaaga qorshaha ilkuhu wuxuu ku qoran yahay dhinaca dambe ee kaarkaaga Aqoonsiga Xubinimo ee Health Share.



Goorta la wacayo qorshahaaga ilkaha

Wac qorshahaaga ilkaha wixii su'aalo ah ee ku saabsan faa'iidooyinka, ama haddii aad rabto in lagaa caawiyo qabsashada ballan ama helitaanka dhakhtar ilkood oo cusub. Lambarka Adeega Macmiilka Adeega wuxuu ku qoran yahay hoosta iyo kaarkaaga Aqoonsiga Xubinimo korkiisa. Waxaad sidoo kale daryeel bixiyayaasha ilkaha ka raadin kartaa website-kaaga qorshaha ilkaha.

Advantage Dental
From DentaQuest

Advantage Dental
Khadka bilaashka ah:
866-268-9631
advantagedental.com

KAISER PERMANENTE

Kaiser Permanente
Khadka bilaashka ah:
800-813-2000
kaiserpermanentedentalnw.org



Willamette Dental Group
Khadka bilaashka ah:
855-433-6825
willamettedental.com

CareOregon Dental

CareOregon Dental
Khadka bilaashka ah:
888-440-9912
careoregondental.org

ODS

ODS
Khadka bilaashka ah:
800-342-0526
modahealth.com/ohp

TTY: 711
(loogu talagalay dhammaan qorshayaasha ilaha)

Waxaad heli kartaa warqadan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Waxaad sidoo kale codsan kartaa turjubaan. Taageeradani waa lacag la'aan. Wac 800-224-4840 ama TTY 711. Waa aqbalnaa wicitaanada gudbinta. Waxaad caawimaad ka heli kartaa turjubaanka daryeelka caafimaadka oo xirfad leh isla markaana la aqoonsan yahay.

OHP-HSO-23-1687

HSO-22326408-SM-0123



Dhoola cadee!

Waxaad heshay caymiska ilkaha



Caafimaadka wanaagsan waxaa ka mid ah ilko iyo cirid caafimaad qaba

Daryeelka ilkahaaga iyo ciridkaagu waa hab muhiim ah oo lagu daryeelo caafimaadkaaga guud. Taasi waa sababta faa'iidooyinkaaga Health Share of Oregon iyo Qorshaha Caafimaadka Oregon OHP) uu ugu jiro caymiska ilkuhu.

Daryeelka ilkaha ee loogu talagalay dadka waaweyn iyo carruurta

Inta badan faa'iidooyinkayaga ilkuhu way khuseeyaan xubnaha da'kasta leh. Xubnaha da'doodu tahay 0 ilaa 20 sano jir, ama uurka leh, waxay helaan *faa'iidooyin* dheeraad ah.

Ma u baahan tahay caawimaad ah in aad aado ballanta ilkaha?

Xubin ka mid ah Health Share ahaan, waxaad heli kartaa taageero dhanka gaadiidka ah oo aad ku aado ballan dhakhtarka ilkaha haddii aanad keligaa halkaasi gaari karin. Iyada oo xiran baahiyahaaga, waxaa dhici karta in aad hesho gaadiid raacid, la bixiyo gaadi raacid ama hesho caawimaada bixinta lacagta gaaska. Wax kasta oo taageero ah, ma jirto wax lacag ah oo kaaga baxaysa.

Adeegani waxaa la bixiyaa iyada oo la adeegsano hawl wadaage, Ride to Care. *Faahfaahinta: RideToCare.com ama wac 855-321-4899; TTY: 711*

Daryeelka ilkaha ee degdega ama dhakhsaha ah

Haddii aad u baahan tahay daryeelka ilkaha ee degdega ama dhakhsaha ah, waa mid la daboolay. Had iyo jeer isku day in aad wacdo takhtarkaaga ilkaha ama qorshahaaga caafimaadka ilkaha ka hor intaadan aadin qolka gargaarka degdega ah, xataa haddii ay tahay habeen ama toddobaadka dhammaadkiisa. Daryeel caafimaad bixiye ayaa kaa caawin doona in aad go'aansato waxa la sameynayo.

Daryeelka ilkaha ee gaarka ah

Waqtiyada qaarkood, dhakhtarkaaga ilkaha ayay dhici kartaa in uu go'aansado in aad u baahan tahay daryeelka ilkaha oo gaar ah. Caadiyan waxaa la daboolayaa kaliya haddii aad hesho gudbinta dhakhtarka ilkaha iyo oggolaansho hore oo ka socda qorshahaaga ilkaha. Qorshahaaga ilkaha ayaa kaa caawin kara tani.

Caafimaadka ilkaha oo wanaagsan waxaa ku jira baaritaan sanadle ah

Xataa haddii aadan lahayn ilko, dhakhtarka ilkaha ayaa:

- Fiirin doona calaamadaha kansarka afka
- Fiirin doona caafimaadkaaga ilkaha macmalka ama, ka hadli doona ilkaha macmalka ah

Faa'iidooyinka ilkahaaga

Baaritaannada, raajatada X-rays iyo nadiifinta

Dahaarida ilkaha (oo ah nooc dahaar oo ilkaha dhowra oo loogu talagalay ilkaha ugu dambeeya; xubnaha da'doodu tahay 15 jir iyo ka yar)

Daawaynta fluoride

Nadiifin qoto dheer oo loogu talagalay cudurka ciridka

Buuxinta

Kabida ilkaha (oo xaddidan)

Saarida iliga

Ilkaha qayb ahaan macmalka, guud ahaan shantii sanaba mar

Ilkaha macmalka ah oo dhan, guud ahaan 10 sanaba mar

Buuxinta salka gawska (oo xaddidan)

Biraha lagu xiro ilkaha 'braces' oo loogu talagalay xubnaha da'doodu tahay 20 jir iyo ka yar (waa kuwo aad u kooban)

Ogow: Faa'iidooyinka qaarkood waxay leeyihiin xad ama u baahan yihiin oggolaansho hore oo ka socda qorshahaaga ilkaha. Su'aalaha? Weydii dhakhtarkaaga ilkaha. Ama la xirii qorshahaaga ilkaha. Lambarka telefoonku wuxuu ku qoran yahay kaarkaaga Aqoonsiga Xubinimo iyo dhinaca dambe ee buug-yarahani.

Aragtida dhakhtarkaaga ilkaha ee sanadkiiba mar waa hab fiican oo aad naftaada ku daryeesho

Baaritaannada ilkaha iyo daryeelka guriga oo wanaagsan (rumayashada/cadayashada iyo findhicilashada) waxay kaa caawin doonaan in aad iska ilaaliso cudurka ciridka. Cudurka ciridku waa ka inta badan keena luminta iliga ee dadka waaweyn. Waanu daryeelnaa ilkahaaga iyo ciridkaaga!

